Sl

3 Oktoobar, 1989.

WAX GARADKA SOOMAALIYEED".

Waxaa la jooga goor aad u qallafsan laba toos haddii la tixgeliyo 'astaamaha ka iffaya dhaqanka dhex yaal aaddamaha adduunka ku wada nool. Dhaqan kaasi wuxuu sugay in loo kala jabay: Hodan iyo Sabool. Taasina wax'ay dhex dhigtay seere' 'addag: "Dhergane' iyo "Qattane'". Qattane' waxaa laga dhigtay 'addeege', u laylyoon quurta iyo caal keenka.

Qorshahaas waxaa ku ba'hoobey: "Hanti iyo 'Aqoon", sid'oo kale Saboolnimo iyo aqoon yarina wax'ay noqdeen "'ul iyo diirkeed aan kala maarmi karin, si ay u buuxshaan meesiga ay qaybta u heleen.

'Addeege' waxaa laga golaystay in uu u dul nugul yeahay, gar darro iyo gurracan oo dhan. Kuwaas oo ah hubka u ku shoobo hodanku.

Hodanka is la helay, 'Aqoonta, Hantida iyo Farsamada Sare', wuxuu yeeshay 'awood u ku hanto burada u adduunka ku haysto. Buraddaasi wax'ay ba'haysay hodan oo dhan, cid kasta oo u yahay iyo meel kasta oo u deggen yahayba.

Teeda kale, waxaa sugan ayana, in u san jireen, hodan haddii ay san jiri lahayn; ummad sabool ah oo kun goor ka badan tirsiga inta hodanka ah.Waxaa taas rumaysay waa soo martada iyo joogtada aaddamaha adduunka ku wada nool. Soo maqantana lagu ma waddo in tubtaas laga leexan doono, haddii aan dalalka saboolka ahi ay san dib u habayn dhaqankooda iyo falaadkooda ba; intii ay kordhiyaan mintid koodda higsedka isku fillaanshaha naf ku taasha nolosha iyo isku tiirsiga dhexdooda, inta kordhiyaan wax is weeydaarsiga, dhaqan dhaqaale,si ay uga tallaabsadaan sohdimaha dambaynta saboolnimada. Kuwaas oo ah saldhiga "quurta"; midab takoorka iyo ku dul noolaanshaha ay jideeysteen dalalka hodmay.Tan kale, dalalka hor'uu maray, wax'ay ka koreen dammanaanta kugu jiidda dagaal kuu keena naafo dad iyo duunyaba, saas darteed b'ay wax'ay u dhisteen xooggag isu dheeli tiran oo ka hor tagga wax keena dagaal sahal loo hurriyo. Si ay u tartamaan, isuna himileeyaan dhexdooda, wax'ay adduunka saddexaad u qaybsheen laba qalbac oo halgan dhex yaal.Si ay u baxnaanshaan hubka ay sanceeyaan,waxaa dagaal laga dhex shidaa dalalka saboolka ah oo adduunka saddexaad, oo ay ayagu hubeeyaan, mark'ay u beeraan dhibaatooyin ku filan iska hor immaad dagaal, si dalalkaasi ugu jiraan had iyo goor, dagaalo joogta ah. Saas b'ayna uga hir galaan danaha dalalka hodanka ahi, kuwa saboolka ah dhexdooda. Danaha dalalka hodanka ahi wax'ay u kala baxaan: "dhaqaale, siyaasad iyo staratejiad ba, is la markaas na waxaa u beerma' dalal madaxda u talisaa ay u kala heellan yihiin xoogga ay ku tiirsadeen, abannimadaasi wax'ay dhaxal siisaa, dhaqan iyo gobaniimo seeg iyo hebednimo ka 'awood tirta 'aaya ka talintooda;xooga ka hor jeeda kan

ay hoos galeen wuxuu ayaga la helaa nabarka u u wado dhiggood. Had iyo goor, jugta waxaa loo marshaa qola walba deriskeedda oo mar hore' shiddo loo dhex dhigay lana safan Xoogga nabarka loo fullinayo.

Bulsho wax'ay saboolnimo iyo dib u dhac uga bixi kartaa, waa haddii u dhexdeeda u jiro, moqoorad kulmiya: "cudduuddeeda, caqligeeda iyo coodkeeda", kuwaas oo bulsha kasta ka siman tahay, ah na hantida ummaddi wada leedahay. Sida kelliya oo kulmin kartaana waa in u jiro:Maamul Qaran oo 'aqoon ku salaysni, oo tallaaboyinka u kala qaadi kara' sida ay u kala mudanyihiin.Taasi wax'ay hana qaadi kartaa, waa marka:" Hoggaanka Qaranka u hayo Talis Siyaasaddeed oo ummadda loo 'addeegayaa ay ayadu madax banaani ku soo xulatay, Madaxda Hoggaanka Qaranka laga xil saaray, ee u san ku immaan boob iyo marooqsi. Haddii Madaxdaasi ay ka soo bixi weydo, xilka la saarayna, wa in isla habkii hore', xilka looga qaadi karaa', shil la'aan .

Meel aan bulshadu garsoorka u sinnayn laga ma fili faro' xasilloonaan siyaasaddeed, meel aan xasilloonaan jirinna, hanti iyo 'aqoon midna ku ma kaysamaan. Bulsho' labadaas weydana, salkeedu waa saboolnimo, maal iyo maskaxba.

'Astaama_haasi waa kuwa ummad ka reeba tartanka aaddamahu ugu jiro', kala bursiga nolosha aayaha le'h, si u uga 'adkaaddo dhibaatooyinka bud dhiga u ah dib u dhaca iyo hagaaska bulshada.

Haddii aan intaas ku soo koobo kor mar guud oo loo simman yahay, wax'aan u soo noqonayaa u jeeddeda qoraalkqkaan gaaban iyo danta aan ka leeyahay.

Waa "Dhambaal u fura'n, wax garadka Soomaaliyeed, meel u joogaba. U jeeddada dhambaalku ka fog, mid ay ku dheehan tahay, faan iyo ha laga sheego, sidd'oo kale ka fog, hanka maahireynta iyo meeris bixinta . Wax'ay se'ila tahay in u xambaarsan yahay, dhiillo iyo dareen is weheshadey, wax'ay na ka soo maaxdeen maan ay ku kulmeen: waaya 'aragnimo iyo wax 'ogaalnimo'. MAANKAAS oo aan lagu dhalliiilayn:hagar ummaddaddeed iyo jara qaadad shisheeye' midna. Wuxuu ka soo dhiimay uur ay mirteen, walaac iyo calool gaddoon. Boogahaas waxaa maanta soo daqniyey, waa 'ilwaad xumada ka iffaysa, soo aaddanta 'ubadka Soomaaliyeed, kuwa jooga iyo kuwa weli uur hooyo ku laalanba, oo wax sareedo ah oo ay shinsadaanna, aan weli 'ishu qabanayn. Aaya xumadaasi wax'ay uurkayga ku sii marxineysaa xannuun dareema yaalka dhiillada maskaxda hurdo seeja'.

Marka haddii aan dood ka furay, 'agablooyinka maanta ummadda dul saara'n, la iga ma filan karo' dabaca iyo turriinsho midna, iga dalfiya, ifinta 'aragtidayda, aan ku tilmaamayo eeddesana yaalka gunta u ah silica dadka Soomaaliyeed.

Annigu wax'aan ka joogaa da' dadka ka haray yar yahay, oo ku soo 'ababtay halgan "Gobannimo Doon", oo ay dhib ku tahay si' ay u qaayibaan dhaqanka qaarkiis maanta Soomaaliya laga xalaalaystay

Tan iyo yaraantaydi (14 jir iyo haatan oo aan lixdan madaxa kala baxay), faan la'aan wax'aan u laylyamay; ka hor tagga wixii hagaasinaya ummadda soomaaliyeed jiritaankeeda iyo keeda qarannimaba. Wax'aan had iyo goor nacab ugu jeedey wixii ummadda dhexdeeda kala qaybin ku haya iyo wixii ayada shisheeye' ka raaca.Sidoo kale wax'aan nacab u 'arkayey wixii ku maamula' talo muraara le'h iyo eex looga kala danaysto.

Dhaawaca dhimirkeedda la gaarsiiyaa, kaygay wax'ay ku 'ahaayeen dhimbiloh dab ah oo had iyo goor shidan, waa na shidnaan doonaan inta ummaddaasi walahoowga ku jirto.

Waa dhib marka ay ummad ku timaado, talo waa' ay keentay saboolnimo maal iyo mid maanba. Waa dhantaal bulsho' u laylyantay, quur iyo qaab xun oo dhanba, markaas na laga golaysto in lagu samayn karo wixii laga doono, oo ay ka mid yihiin: naf u darran kasta, inta' loo xalaaleeyo waxa ku xun nolosha iyo dhaqankeedda, sida: dhaca, beenta; dibin daabyada maattadda; dhaleecaynta qofka ay san ku ool iintaasi; 'asluub xumada iyo hubin la'aanta ay ka mid noqdaan, saldhiga dhaqanka bulshada.

Waa dhantaal marka ay bulsho' ka hir galaan: 'amaanta tuuga ceebta u jooga iyo maan gaabka, laga na hiiliyo, 'aqoon yahanka bulshada ka soo dhex baxa. Waa dhaawac dhimirka iyo dareema yaalk maanka ku yaal, marka ummaddi han le'ekaan weydo dhigeeda tartanka ugu jira' taabidda nolosha 'aaya tiinka dhigaal le'h. Waa dhaawac bulshada ka dhex muuqda, marka ay ka il duufto, in wax la beerro ay u hodan santahay maskaxda aaddamuhu. Inta' ay dihintahay maskax ummaddeedna, bulshadaasi ka fog 'awood ay ku hanato ama ay ku gaadho nolol salka ku haysa: tawl dad iyo tara'n duunyaba. Waa dhaawac, bulsho ka gudhay,hal 'ugbinta 'aqoomeed oo ka soo dhiinta maskax cabsi la'aaneed . Taas oo bulsha kasta u ah jaangooyada lagu himileeyo,qodnaanta mintidkeeda higsedka nololeed, ay kula jirto ka lib keenka dhibaatooyinka tiirka u ah, dib u dhaceeda. Waxaa kale oo lagu himileeyaa inta ay qodantahay dul qaadka ay u leedahay xanafta xannuunka kaga yimaada jillaafooyinka ay bulshadu dhexdeeda isu dhigayso. Sida la wada 'ogyahay, bulsha kasta hor u tallaabsigeeda waxaa sal u ah mintid koox 'aqoon yahan ahi ay habab cusub ku soo biirisa , markaas na u hinjisay xaga hana qaadka nolosheeda. 'Ugbinta habka cusub, waxaa ka mid ah helidda iyo sugidda hab "Siyaasaddeed" oo bulshada qabadsiisa tubta hor u marka oo bulshada horay uga dimoonaa, oo ay markaas ku xoorto hilayga saboolnimada si walba ah. Waxaa ka mid ah oo kale

farsamooyin sare iyo gunudda sheensada helideeda. Kuwaas oo ah qalabka loo ga 'adkaado 'agablooyinka naafeeya karaanka dad weeynaha iyo tan qofkaba, sida cudurada safmarka ah, oo ay mar hore' caabiyeen dalalka hodanka ahi. Sida wax soo saar gabka ay ka yimaadaan, isku fillaansha la'aanta ay ku soo gabadaan, 'agablooyinka ay ka mid yihiin: boqon heerka hulshada, 'aqoon yarida, baaha cuddurrada hora tibyeeya nafta nugusha ummadda oo dhan, (carruuraha waayeelka, 'umulaha iwm); dhigaal la'aanta, nabad iyo xassil darro';dilka, tuugeysiga, doocataynta, taliska caburka iyo daba galka iyo gurracan oo dhan oo lagu sameeyo mudanta ummadda, dhaxal wareegga hiddaha iyo suggaanta oo kuwa shisheeyaha laga sar marriyo. Horoorka oo libta madal ku qaatta , hanka iyo hungurriga oo dan sohdimo la'hayn, dhagar qaran oo lagu nabad galo, dagaaloh sokeeye' oo beel dumis la jooga'; hadal yar, bulsho si walba ugu shalwatay hadaamoh aan ka soo hoyasho la'hayn oo hantaqoodu dheer yahay.

Mattanaynta sancadda iyo farsamadda oo moqooraddan baa ummaddii uga baxdaa haadamaha saboolnimada iyo kufinta 'agablooyinka aan kor ku soo sheegnay.

Ummaddii wax'ay Qaran iyo qadderin ku seektaa:

1.- Maankeeda, maalkeeda iyo muruqeeda oo aan moqoradnayn;

2.- Mudanaheeda, maan gaabkeeda iyo mattadeeda oo la isku wada jimeeyey, si aysan dan koox la'dan u kaalin cirriiryin, sida maanta dalka dhex taal, oo laga dhawray dhexdeeda kala mudnaan, mar kaasna qof kasta isu qaatay in isagu u yahay rubadda keliya oo bulshadu ka neefsato, taasina waa hab loo qorsheeyey;

3.- Marka ay laalmaan xeerarkii bulshada wax u qaybin jirey, oo ay ka 'awood roomadeen: xigtada iyo weji garadku;

4.- Marka Guddoonshaha Taliska Sare oo xilku saaran yahay, ay isaga iyo xigtaddiisa qoys ka sare' mareen, QARANKA IYO Maamulkiisa Guud ba oo ay Destuurkii Guud oo bulshadu ay ku xalaalaysay " Afti Dad-weeyne, ugu falaadeen hadba sida dantoodu ku marayso;

5.- Marka xil dhimaanadda lagu haleeyey hir gellinta hawlaha QARANKA, aan laga suggeyn in maamulku u 'addego danta ummadda Qaranku ku taagan yahay ee ay ku 'arkaan indhaha, ku danaysiga gaar 'ahaaneed; 'awooddii Xeer ilaalintuna ay indhoh iyo 'ilkaba beeshay. Markaasna qof kasta oo bulshada ka tirsani, u xalaalaystay, xeel kasta oo u ku keeni karo' liqmada maallintaas ah oo wax loo aaba yeelaa ay dhamaadeen;

6.- Marka ay galooftay, maxaad taqaan oo ay ka taag roomaatay yaad taqaan, halkaasna xirfadi ku mudnaan beeshay;

7.- Marka ay 'aqoontii sheelantay oo ay ka sare' mareen: "fal diihaal keenay iyo fara marooqsigu; wixii dhibka feyddi la'haana, hawl gab laga dhigay oo ay talo ku dhamaatay:"annigaa 'og iyo annigaa iri";

8.- Marka xibin maal dad weeyne' ku maqanyahay, aan dhabiilli ka daba imman oo aysan dhabiishaas ku kala harin: "eeddeysane' iyo 'abaal mudane'";

9.- Marka dammanaanta 'aqoon yaro' oo dad weeynuhu daboosho kartida, dhiiftoonaanta iyo dhiilloonaanta 'aqoon yahannaddu, had iyo goor u heellan tusmada boogaha buslhada ku heraaray deydka saboolnimada, si walba u muuqda. Ummaddaasi badi wax'ay dhaxashaa, luggooyooyin aan yarayn, oo tallaabooyin keeda, had iyo goor, dib u jiidda. 'Aqoon yahannada taladoodu wax ku oolka tahayna, wax'ay mutaan: caddaadis u badan, xabis, iska hayn, u badan oo aan mudo loo qaban; hawl ka farrisinta sabab la'aaneed; hawl gab u dir aan dai' keenin, af-qabad; oroh iyo qoraalba , iwm;

10.- Marka ay bulshada dhexdeeda lagu beerray, anshax xumada maamus la'aaneed iyo is dhaanku ay noqdeen, dhaqanka la wada qaayibey; teeda kale na mintidka iyo ceeb ka fogaanshaha, talo keenka iyo tub san ku toosintu, loo 'ekeysiiyey ,'astaamaha nacasnimada iyo dan seega, oo lagu dhalliilo ninkeeda, in u yahay kan ka hakinayey bulshada tubta loo maro' nolosha cusub oo il baxnimada ay bulshadu higsanayso;

11.- Mark'aan Qaranku ku tiirsanayn, 'awood ay saldhig u yihiin, maallidda, maskaxda, maalka iyo muruqa ummadda qaranku ka soo beermay, 'ogaal iyo 'ogaal la'aanba wuxuu 'addeegaa u yahay danoh Qarama kale, oo aan tiisa daryeeli doonin sinaba.

Teeda kale, Qaranna ma maali karo 'awoodda ummaddiisa haddii u san marka hore' daryeeli karin, danaha guud oo dadkaasi wada shinsanayo, haddii u san bulshada dhexdeeda ka hir gellin karin, in "dhibka iyo dheefta" qaranka ummaddu ay u simmantahay, gartuna ka 'awood weeyntahay, gefka iyo eexada;

12.- Marka QARANKU 'awooddi waayo in bulshada dhexdeeda u ka hir gelliyo qadderinta iyo maamuska qofku mudanyahay.Marka ay farsama yahannada iyo 'aqoon yahannada kale,ay bulshada hawleed ka geli waayaan meesha kaga aaddan.Mudnaanta meesiga hawleed baa 'aqoon yahanka u tebisa ee haddii marka hore ba aan mudnaan hawleed aysan jirin, la ma filan karo' in suggaanta mudnaantu ku 'aroorto marinka ku toosan. Markaas waxaa tix gellinta mudnaanta dhaxla': "Sawlax been laha iyo 'af miishaarada had iyo goor u jooga nabidda dadka aan ceebtu ku tirrayn.

Hadal kooban, waxaa maanta ummadda dhigay da'leesha 'agab la'aaneed, waa iimaha kor ku sheegan oo hoosteeda ku gaamurey oo Taliska xil Qaran saarenyahay u ka dhigtay: "habka Maamul Dawladeed Qaran".

Marka haddii aan ka soo haro', tusaalaynta iyo wax sheega shidanta kor ku qora'n, waxaa is weeyddiin le'h: " maxaa xal u noqon kara' dhibaatooyinka maanta guudka ka saara'n iyo aaya xumada u kaydsan da'da dambe' soo maqanta"?

Inta aanan 'arrintaas wax ka tusmayn, waxaa 'ila haboon in la taabto dhuumaha ay ku soo 'arooraan dara'nta bulshada marax tiray iyo qotta dheerrida la'hankeeda, timmaddada ka soo ifi doona.

Anniga 'aragtidayda, waxaa haboon in tira koob lagu sameeyo tirsiga,"Nacabka ummadda SOOMAALIYEED", marka hore' si' loo 'ogaado hulalka ay Nacabkaasi ku dhuuntaan.

Nacabka aayaha soo aadanta 'ubadka soomaaliyeed waxaa u weeyn, marka la is garab dhigo dhibka ay la joogaan:

1.- Taliska iyo Guddoonka Maxamed Siyaad Barre, oo toos iyo dadaba sal u ah dhibaatooyinka iyo cuyubanta ummadda maanta ku ridey, dammaadka iyo kala daleel raaca. Ina Siyaad Barre, wuxuu Taliskiisa tiirar uga dhigay u ku taagnaado: a) in u dadka ka dhawro' wax keeni kara' talo tiisa ka 'agab roon oo dadweeynaha danahiisa daryeeli karta; b)-wuxuu bulshada dhexdeeda ka dhawray wax tiisa is hor taagi kara' oo maya' 'oran kara', talada meermeertada ku shalwatay; c) - wuxuu jiddeystey in aysan sohdin kala yeelan hantida Qaranka iyo tan reerku; d) - wuxuu sahley in Isaga iyo xigtaddiisuba ay ka saamaraan, Destuurka iyo Xeerarkii ummadda u degsanaa hortiis, kala haggidda bulshada Qaranku maamulo; e) - wuxuu colaadiyey bulshada dhexdeeda wixii lagu tuhmo karti iyo 'aqoon tiisa ka heer saraysa, wuxuu kor u qaaday, dammanta iyo inta holliska ka 'oggol, kuwaas oo u hor yaal uga dhigay, maamulka hawlaha Qaranka; f) - wuxuu marin habooyshey habkii wax barashada bulshada iyo baahinta suggaanta 'aqoonta ummadda Soomaaliyeed, kuwaas oo maanta walhad ku jira' iyo in af iyo 'aqoon shisheeye' ka taag roomaadaan; g) - waxaa hoostiisa ku hanaqaaday: eexda, boobka xoolaha dadweeynaha, garab ku taaglaynta iyo isku dilka ummadda u isu coleeyey; h) - Qarannimo midnimadeed wuxuu ka sare marriyey, qabiil u kala qoontaynta bulshada iyo kala xigsadkeeda beenta ku salaysan; i) - waxaa dhegtiisu u jeeshay: " xanta, nabidda 'af-miishaarka war kiisu noqday salabka jawrka iyo dabagalka qofka aan dembiga gellin; k) - wuxuu hagaasiyey 'awoodda wax soo saarka bulshada oo u ka hor joogsadey tubta is tiilka kordhinta hanka isku fillaansha nololeed higsadkiisa, wuxuu galoofiyey ilaha ay ka soo maaxdaan suggaanta 'aqoomeed oo bulshadu u jeellan tahay iyo hilaadinta nololeed oo ummadda dhigeed ku nool yahay adduunka; l) - Dad weeynihi wuxuu u qaybiyey: " la tirsey sokeeye' u 'eg iyo laga tirsey shisheeye' u 'eg, waxaa kale oo u u qaybiyey, war iyo weerar u jooge' iyo weegar ku jire'". Taliska Maxamed wuxuu bulshada kala dagaalamay, maan 'irmaan iyo middig 'irmaan; m) - Sareeye Guuto, wuxuu weji gabax la'aan u bareeray in uu shirarka Golayaalka Qaranka hortoodda u qof kasta ku yiraahdo: " u kaadi aan marka hore ku toosiyo eh", taasina wax'ay ku ti'maadaa, 'aqoon yahannada xil qaadka ah, sida: Dhakhtaradda, Farsama yahannada, Dhaqaala yahannada iyo qof kasta oo isaga uga 'aqoon roon 'arrinta doodu ka fura'n tahay, sida baarridda cuduradda iyo daawadda ku haboon; sida dhismaha ama sida jaan gooyada ilaha Dhaqaalaha, hawlahaas oo leh xeeloh gaar ah si lagu hir gelliyo, Xaajiguna u doonayo in uu af ku toosiyo- sideed Soomaaliya u galooftay!

Marka haddii ay timaaddada suura gasho in maalin, SAREEYE' GUUTO, lala dhabiiltamo, wuxuu ku 'eeddeysnaan doona, intaas oo dembi ah iyo in ka badan oo u kaydsan, meel u joogaba, ifka iyo aakhiraba.

waxaa taas garab yaal, haydaartooyin badan oo ay dadka iyo dalka soo gaarsiiyeen, Nacabyada kale. Waa Kooxaha Shisheeyuhu soo hubeeyey, oo dhabar jebin ku sameeyey ummadda iyo Qarankaba, welina ku haya dhibaatooyin ay ka soo kabashadoodu ay aad u 'adkaan doonto. Kuwaas oo ayana aan ka filan doonin bulshada dhexdeeda: dabac, garawsho iyo dembi dhaaf midna.

Kooxahaasi waa kuwa hab qabiil ku beer laxawsaday bulshada qaarkeed, sii ba qattanta iyo maan gaabta ay ka diimoon yihiin u jeddooyinka dabka loo shiday iyo waxa shidayba, waxaa ka diimoon oo kale aaya xumida sugeysa ayaga iyo dhashoodaba soo maqanta ay la dihintahay timaaddadu.

Belo' kala daran'ah Kooxahaasi wax'ay dammanta u taxaabeen meeshi' ay kaydsameen goddobta iyo karta Soomaali ka maqan. Gartaas 'abaajidey oo shisheeye oo dhammi guddoonsadey in ay duudsi noqoto, si ay ugu xalaalowdo' Nacabka weli gumeysta dadka iyo dalka Soomaaliyeed. Teeda kale, Kooxahaasi wax'ay ku 'orshaan in ay xorayn doonaan soomaali aysan ka mid ahayn tan weli run ahaan la gumesto. Loo ma sheego hodanta la soo gurdan raacshey in la xoreeyo dal iyo dad Shisheeye' weli gumesto, wixii kale oo dhaqdhaqaaq ahi na ay ka mid yihiin, halgaka siyaasaddeed oo wejiyada badan leh.

Hadal yar, Kooxahaasi wax'ay ku 'eeddeysan yihiin, taarikhda iyo bulshada hortooda:

1.- In ay yihiin, kuwa hubkii nacabku u qaybshey ku naaffeyey dalki iyo dadkiiSoomaaliyeed oo aan deyn iyo dhagar midna qabin. Waa kua haddana ummadda ka golaystay in ay ayaga u garawdo intii ay u dul qaadato : dilka, boobka iyo burburka ay ku sameeyeen dad iyo duunuaba;

2.- Wax'ay ku 'eeddeysan yihiin, in ay dalka iyo bulshada dhexdooda, sida shisheeyaha, meel walba ka dhigeen: uurdoox, siqiir gawrac iyo dab surka gabbaadkii hoshada; markaasna u baxay dhoodda iyo sacab tunka, laga naadsho dibeddaha, haddana ka doonay bulshada ka hartay hagaasintaas, in ay la sugto ubax iyo gamcoh fura'n;

3.- Waa kuwa weji gabax la'aan,ku faanay in geesiyadooddii ay guulo ka soo hooyeen goobihii ay cadawga isku heleen.Cadawgaas oo ah Ciiddamada Soomaaliyeed oo rumaysan in ay daaficidda dalkooda iyo jiritaankiisa Qarannimo. Faankaas oo ka ay naadiyeen "iddaacooyinka dalalka Yurub, sida: "BBC iyo Raadio Farance International", ayna ku qorteen wargeysyada ugu af dheer kuwa ka soo baxa dalalka Reer Yurub, haddii ba meel la iska dhigo, qaybta joogtada ah oo ay Raadiyo Addis Abba ku leeyihiin; dalka magaladaas oo ay u soo hawl galeen. Godob iyo ciddeed, cadawguse' waa Soomaaliya oo aan qabiil iyo Talis xumaaday midna u san gaar u la'hayn;

4.- Waa kuwa ummadda dhaxal siiyey dagaal sokeeye' oo aan qorshoh iyo kalsoomi ummaddeed midna ku salaysnayn. Qorshuhu waa mid Siyaasadded oo bulshada badideedu taageersan tahay, wadana hareero joogto, bio shubadkiisana horay loo jaan gooyey.

ee marooqsi dagaal ku ma galo, wixii habkaas Siyaasaddeed ka leexsani waa dooxatayn iyo docfaruur ay ku talo bexeen dooxatooyin 'ugaaroobey oo habar wacad qabiil isku biirsaday.Sida ay soo martadu na bartayna, bulsho' habkaas ku ma hana qaado, waase' ku hagaasta. Dadab iyo toosnaba, koóxahaasi wax'ay u 'addeegaan dana shisheeye oo tooda salka ah lid ku ah. Danaha loo 'addeegaa wax'ay leeyihiin wejiyo badan, dadab iyo toosba, waxaa na sugan in aan QARAMADU aysan sadaqo waxaba u bixin. Marka qofkii 'arrintaas garawsha u hayaa ha soo ban dhigo, doodi fura'n 'eh.

5.-Waa kua baday mudantooddii iyo mattaddoddiba in ay dawersadaan dhuleedyada shisheeyaha,markii ay ka xayuubsheen qabkii aaddamaha u dhiggin kula han le'egyahay.Ummaddaas salkaca cayreed lagu marrin haboowshey, inta la soo dhoobay xeryaha laga ooday xadafiirta 'agab la'aaneed oo loo sameeyey gurmadka sama falka cayraha aayahoodu sareedada ku laalantahay. Marka maxaa madaxda kooxahaasi qorsho u haysaa ummaddaas ay dhaca iyo mooraduuga kaga soo kabato? Mase' 'awoodda ayaga loo qorsheeyey baa wax'ay wuxuu ku kooban ayd gabawarka iyo gondo goynta, dadkaas dalkeeddi ka soo xuduun goysey? Sida sugan 'awood ma leh ay ummaddaas nolol dib ugu qorsheeyaan aan ahayn in ay maaweeshan sareedo beeneed; aan sina lahayn kayd timmaddada loo baxsado, maattadaas loo durbaan tumayna ku ma baraarugto il xumada aayaheeda oo dib uga ma tashato kooxda ku ugaarata. Waxaa ku waas la mid ah: waa maattada kale oo Maxamed Siyaad Barre ku beer dulucsado xigto qabiil, oo lagu gurdan raacsho in ayaga laga qaadayo Dawlad Talis Qaran oo ay gaar u leeyihiin. Isaguna u ka dhigto xaabo dabka lagu shito, si Taliska ay ku nool yihiin xigtadiisa qoys iyo kooxaha dhuunniga ku taageersan u u sii jiro'. Makastaas xigtadu keentay waxaa dusheeda ku dhaca, dad iyo duunyaba dhibaat'oo dhan oo aan garawsho lahayn,saa bulshadu wax'ay u 'arkaysa in ay eedda la wadaagaan, jawrka iyo caddaadsika Talisku ummadda ku hayo, ee loo ma 'arko in dan yarta ciiddamada loo qoray ay u 'addeegayaan Qaranka iyo daaficidda dalkooda iyo ummaddodaba. Makastaas la su gabraarsada ma garwaaqsato in wixii dad weeynaha dantiisa ku xumi in ay ku xunyihiin ayaga dantooda, teeda kale, ma gartaan in Qaranka aysan dadka uga sokayn ee u yahay wax Soomaali oo dhan u dhexeeya. Ugu dambaysta ma garwaaqsadan in ay ku eeddeysan yihiin wax dhib iyo dhimasho ma ahe' aysan dadka kale ku dheerayn nolol bursasho.

Sida soo martadu na bartay, tan iyo intii bulsho ku toostay hawl galka dhismo QARAN, wax'ay soo martay dhibaatooyin ay keenen dagaalo iyo is diid sokeeye', oo had iyo goor hor joogsan jirey, waddiiqooyinka loo maro dhismo Qaran iyo hana qaadkiisa. Saas b'aysan soomaali gaar ugu ahayn,xannuunka, geerrida iyo dhaawaca dagaalka sokeeye' keenay, waxaase' gaar ku ah waa talo iyo tabar waaga ay la ridbatey iyo soo toos la'aanta. Waxaa gaar ku ah oo kale, waa in kooxdii

to isku raacdayba ay gaar ayadu gar isu siisay, markaasna ku dooday in ay dooneyso hanashada danta guud oo ummadda dhex taasha u ah. Markaasna ay gartu doonto in la is haybsho: "ummaddee, dantee, iyo habkeeh"? Wax weyddiintaasna war celin loo waayo.Dhibaatooyinka la soo gudboonaada dhisniinka qaran waxaa keeni jirey: "Gobol doona in uu gaar u go' ama qabiiloh u hogaansami waaya xeerarka ummadda Qaranku jiddeysatey ku dhaqankooda. Sida la wada 'ogyahay, hana qaad Qaran wuxuu ku taagan yahay: dhiftinta dhiibidda iyo dhimashada ummaddiisa. Hawlihiisa waxaa lagu meel marshaa, dulqaad iyo mintid lamaanaysan ee ku ma galaan anniga ii danee. Qaran wuxuu ka dhismaa beeloh madaxooda bisayl siyaasaddeed ku kaydsamay, madaxa ceerinka ahi hawlaha qaran buu calaanjiyaa. Hubaal qaran wuxuu ka hana qaadaa beeloh, 'aqoon iyo garaad madaxooda ku baartey, oo ka koray dulnugeylka beer laxawsiga bura doonka qabiiladda iyo hiifkooda diihaalku dabada ka wado. Qaran ka ma soo haro, hoo badan iyo hiil badan oo dadkiis had iyo goor la hareero joogo, gaarna ugu dhiiftoon hadba dhiiladdii soo dhacda.Qaran marna ku ma taagsado: koox yar ku danaysigeed, oo ummadda ku jiidda tubta kala guurka iyo haantaa wilifka. Teeda kale, Qaran ku ma galo, dabacsanaan, sodohin iyo dhabar salax kooxoh yar, taas oo ah eexda iyo tuhunka salkooda. Qaran waa kii Hogaankiisu yahay barta lagu soo hirto ee ma aha,kan ummaddu ka yaacdo ama colaadsato, dhibna u beerto ay moogtahay in dhibku ayada ku soo noqon doono.

Qaran waa kan ku beerra bulshda dhexdeeda u laylanka wada noolaanshaha iyo sinnaanshaha garsoorka. Waa kan dhexdeeda bulshada jiddeeya in loo simman yahay:Dhibka hawleed iyo dheefta Qaranka ibihiisa irmaan. Qaranku waa kan aad kula han iyo qab le'egtahay aaddamaha kale. Haddii kale wax'aad weligaa tahay: taag iyo talo daruane' quurtu qabato.

Qabiilkuna waa dhuumaha ay ku soo 'arooraan waduiiqooyinka saboolnimada iyo 'aqoon yaridu. Qabbiilku waa kan jifedda u ah dagaaladda sokeeyaha iyo hoos galka shisheeyaha, kugu danaysta oo kaa feyda hagoogta qabka gobannimada iyo tan aaddanenimada. Waana dhaba yaasha ay soo qaadaan "Gumeysiga iyo ku dul noolaanshahu u watto. Qabiilku waa dhaqanka kaa reeba, dhaxalka handka gobannimada. Qabiilku waa dhaqanka aan tarantiisu ka dhaxlin :"Dhigaal Dhaqaale iyo 'AQON taabba gal ah", aayihiisa ummaddeedna ay 'odoorosta xunyihiin. Dhaqanka qabiilku waa kan kaa daba marriya tartanka, aaddamaha kale ugu jiro taabuidda noloosha hana qaadka le'h. Waa dhaqanka ay qaalliga la yihiin; gefka iyo qallooca ku qarddan mudnaanta qofka. Waa dhaqanka aysan xanafta la la'hayn baryadda dhiggiis. Waa dhaqanka gacan ku dhiigluhu u yahay hor Yaalka ba'hda ka 'ammaanan;

6.- Kooxuhu waa kuwa, weji gabax la'aan madaxdoodu lib sheegashada kaga 'orshaan "Iddacooyinka Reer Yurub, markii ay maattadooddi ka soo sal kiciyeen dalkooddi, soo na dhoobeen xeryoh ka oodan xadafiir 'agab la'aaneed, markii ay dhaafeen dad iyo duunyaba.Madaxdaasina ay caruurtooda ku korshaan,Yurub iyo Ameerika nolosha taal.

Waa kuwa aan ku hamiyin dib waxa ay noqon doonto, aayaha ummadda durbaanka dibedda looga tumay oo gurdanka soo raacday. Sidaas oo kale kuma hamiyiyaan, siddii ummaddaas si walba u jabtay, dib dalkeeddi loogu soo cellin lahaa, inta dib loogu habeeyo nolol hor le'h, ee wax'ay weli dadka ku hambaasiyaan in ay guul soo dhow kaabiga u joogaan, si ay maan yartaasi weerarka iyo 'ugaarowga uugu sii jirto.

7.- Kooxahaasi waa kuwa u bareeray, maydhaanka iyo madal ku cayga dadka iyo dalka Soomaaliyeed iyo qarankeedaba, intii ay dad iyo duunyaba cirrib gooyeen, oo ay la tahay in ay MAXAMED SIYAAD BARRE wax yeeleen, sidii u isagu yahay Qaranka soomaaliyeed. Waxaa kale oo kooxahaasi maydhaameen waa magaca: "Gobannima doonka" oo ay ka dalfiyeen marrinkiisi lagu yiqiin, tan iyo intii magacaasi adduunka ka hir galay.

Siddii horay loo sheegay,"Gobannimo doon" wuxuu ka soo dhex dhasha bulsho dalkeeda shisheeye' weli gumesto. Marse' haddii ummaddi ay madax bannaani qarannimo gaadho', qarankaasna laga aqoonsado gobannimaddiisa adduunka kale, oo la sugo' sohdimaha ay ku simanyihiin dhulka uu ku fadhiyaa; wixii dhaqdhaqaaq ah oo dhexdiisa ka soo dhashaa waa kuwa siyaasaddeed oo ka hor jeedi kara' habka u 'addegsado Taliska xilka Qaranku saaran yahay, maamulkiisana la saluugsan yahay. Ururadaas Siyaasadeed oo is hor taagey: "hanad waaga maamulka hawlaha Qaranka" oo lagu 'eeddeeyo " Gar hayaha Taliska Guud", wax'ay u qaybsami kara'n, dhawr qaybood: Uruuroh Xisbiyoh, qorsho siyaasaddeed, oo lagu gudbo habka markaas Dawladu wax ku maamusho, inta muujiyaan in qorshohoodu danta ummadda u aaya roon yahay haddii la garab dhigo, kan jira'. Haddii ay taasi socon weydo, waxaa soo dhasha Uruuroh kale oo ku tallaabsada dhacdooyin, is dhigashada iyo ladnaanta u xaraarriya kooxda Hogaanka Qaranka gacanta ku haysa.

Marka hore' Uruuradaasi wax'ay bilaabaan bannaan baxyo , ay ku soo bann dhigaan waxa ay ka horjeedaan iyo far ku fiiqa dhibaatooyinka lurkoodu lug jiidka ku yahay nolosha bulshada, wax'ay shirarkaas ka sheegaan waxa ay doonayaan in bulshada loo qabto. Haddii ay labadaas hab mira dhali waayaan,Uruuradu wax'ay ku tallaabsadaan dhacdooyin halis ka taabta Taliska inta loo meel dayo. Dhacdooyin kaas wax'ay ka digtoonaadaan wax yeelladda taabashada meelaha bulshda halbowlaha uga yaal, oo ay soo maraan nolosha dad weeynuhu. taas waxaa ka mid ah in laga fogeeyo looltanka Siyaasaddeed dhacdooyinka sahal isu roggi kara' hurka dagaal sokeeye', oo aan cidna dani ugu jirin, dagaal sokeeye', urintiisu waa sahlan tahay, demintiisuna waa 'addagtahay! Waxaa fajignaanta ka mid ah oo kale waa qarxinta meelaha ay ku yaaliin 'ilaha dhaqaale oo haddiiba taabta dareenka bulshada, la'hanka dareenkaasi wuxuu ku soo rogmadaa mar badan, kooxdii talada lahayd oo dib u dhutisa halgankeeda siyaasadeed, maxaa yeelay

bulshadu ka ma garawdo dhacdada taabatta nolosha dad weeynaha, taasina wax'ay qaymo tirtaa halganka siyaasaddeed oo dhacdadu ka timid, markaasna waxaa ka lib hela' Xukunka Taliskiisa la wada hor taagan yahay, oo 'iddaaco ku samaysta, si u u daboolo iimihiisa u ku 'eeddeysan yahay, halkaas oo dhantaali ku gasho qorshihii Uruuradu jaan gosteen.

Marka waxaa la 'oran kara': halganka loollanka Siyaasaddeed waa halgan, "higsanaya "hab iyo rugdoorsi" oo ka hor jeedda Siyaasadda ay wax ku maamulaan kooxda Talida Qaranku gacanta u gashay, oo ay ka luntay kalsamooddii dad weeynuhu.

Teeda kale, sida la hubsaday, aaya sami ma le'h, halgan ay hogaaminayaan kooxoh u shisheeye soo hubeeyey, suu u 'addegi maayo daryeelka danta dad weeynaha 'eh. Haddii kale, marka hore ba dadka ka ma talo bexeen, haddii u isaga u hawl geleyo.Weliba ka sii darran marka hubka laga soo qaatay Dawlad dad iyo dalba kaaga maqanyihiin, qaranka jirana weerar joogto ah ku haya, oo dad weeynuhu ugu jeeddo in dalkaasi yahay Nacabkiisa koobaad.

Xabashadda iyo shisheeyaha kale oo kooxahaas laga soo hubeeyaaba, wax'ay leeyihiin danoh lagu naafaynayo ummadda iyo Qaranka dubbaha loo watto in hallis laga la helo'. Ummadda Soomaaliyeed u ma kala duwana laba xoog oo dal laga soo hubeeyey isku golana looga taliyo.

Sida loo bartay jawaabtu waa: "CIIL CADAABKII BAAN KA DOORTAY", oo wax'aanu dooneyney in annu Maxamed Siyaad Taliska ka turro. Marka hore ma waxaa la kala doortay, Taliska Maxamed Siyaad iyo hoos galka Mingistu Xayle' Mariam? Marka labaad, Mingistu, ma ka xaasan qabowyahay, xaga dhiig cabnimadda iyo xaga dhaqanka siyaasaddeed Maxamed Siyaad Barre? Tan saddexaad, maxaa loo waayey Amxaaro Maxamed Siyaad, hub ka soo doonata oo dalkeeddii kula laabata oo maattaddeeda ku soo laysa, markaasna Soomaaliya ku soo laabata, oo mar kale dib u la duusha Ciiddamada Soomaaliyeed, saa Mingistu Xabashi wuxuu ku sameeyey wax ka xun waxa Maxamed Siyaad dadkiisa ku sameeyey eh? Sida la 'ogyahay la ma hayo weli dad ka soo yaaca Xabashada oo u soo gala' Soomaaliya oo aan ahayn maattaddada ka soo qaxda ummaddaha ay Xabashadu gumeysto sida, Soomaali Galbeed , Soomaali Abo iyo Eritrea. Halkaas waxaa ka ifay in bulshada Xabashada ay u kala soocanyihiin, Taliska markaas jooga iyo waarridda Ummadda iyo Qarankeedda. Bisaylkaasina weli waa ka maqanyahay, Kooxahaas iyo Hor Yaalkoodaba annaga naga dammaaddey.

Hadal yar, waxaa la 'oran kara' in, wax kasta oo ay gar u makaansadaanba, ay kooxahaas yihiin 'addega yaal shisheeye', tii ay geysteenna ay ma hadho' reebtay, ayaga iyo dhashooda u kaydsan. La ma na filayo in ay timmaddada kalsami ka helaan bulshada Soomaaliyeed.

oo ay ayagu "HOR YAAL KA NOQDAAN".

Jawaabaha halkaas ku maqan, intihada soo maqanta baa dadka ka hor sheegi doonta ee ha laga war sugo. Inta taas ka horeysa, waxaa 'ekoon in maanka lagu sii kaydsho, culayska iyo ballaarka ay leyihiin dhibaatooyinka iyo deynka ummadda iyo Qaranka loo geystey, kuwaas oo ay u qoolan yihiin Madaxda Kooxahaasi. 'Agab la'aanta ummadda loo geystey wax'aan ka soo qaadnay kuwan hoos ku dhigan:

1.- wax'ay u dhaqmeen sidii u san dalka Soomaaliyeed ahayn dhaxal ka dhexeeyah dhashiisa meel ay joogtaba, oo koox qabiil isku biirsatay ay wixii ay doonto ku samayn karto, sidii ay doontana ugu falaadi karto. Marka Garta Qaran wax'ay xalaalaynaysa in laga la hor tago hab kasta si aan falaadkaasi u meel marrin, haddii kale qaranba ma jiri karo, haddii dhaqankaasi la wada jiddeysto. iwaa waajib qarannimo in dhib kasto loo bareerro, in kasta oo dhaawaca iyo xannuunku dhanyihiinba.
2.- SSDF,SNM iyo kuwa kale oo dhawaan shisheeyuhu dibedda ka naadshaaba magacyaddooda in ay ku salaysan yihiin, hab qabyaaladi dhar u tahay. Marka, habkaas oo kale waa ka fogyahay mid ku hawshoon u 'addeega dayac tirka danaha Dad Weeynaha Soomaaliyeed iyo hab siyaasaddeedka u doorriddiisa, ay ummaddaasi wada shinsanayso. Marka kooxahaasi wax'ay docfaruur ku sameeyeen halgankii bulshadaasi bilawday tan iyo 1979kii si Hoggaanka Maamulka Siyaasaddeed u haleelo tubta toosan oo sinnaansha, garsoorka iyo muunaynta qiimaha qofka ka tirsan bulshada qaran.

Kooxahaas waxaa ka hoostay in ay gartaan in habka ay halgankooda ku bilaabeen u yahay midka ayaga ka dhigaya, 'addegayaal loo hubeeyey in ay guryohooda soo gubaan, markaasna ummadooda ka fongarraadaan, marka ay mattaddooda soo laayaan. Waxaa laga waayey dhexdooda , indheer garato ka digta aayatiin xumada ka dambaysa falaadkooda, u geeyey in ay u 'addeegaan labada nacab oo dalkoodu leeyhay, sida Xabashada, Keenya iyo dalalka Reer Yurub oo kuwaas ku taageera duudsi gaarsinta dalka iyo dadka Soomaaliyeed oo ay weli gumestaan.Ayaan darro', talada ma helo ruxii aan dib u sii dhaawillin waxa ay noqon doonto dhacdaddiisu. Haddii kale wax'ay hubsan la'haayeen in hub qaadku ka mid yahay, hiilka u weeyn waxa shisheeye' kaa helo, maxaa yeelay, waa hiil ka taageera' laba curufoo:" carriiqsiga iyo sii cadaadinta kuwa la gumesto iyo naafaynta Qaranka ay ummaddaasi shinsato".

Waxaa marka is weyddiin leh, sideeba Xabashadu u 'aragtaa Kooxahaas ayada ku tiirsaday? Wax'ay u 'aragtaa in ay yihiin: dad dammaadey, oo u 'addegga CIILKOODA iyo CALOOSHOODA".'Eraygaas waxaa laga hayaa nin ka tirsan madaxdooda, oo isaga oo ka maruuryasan quurta Xabashada, ku cattaabay, mar kooxdiisu so af-duubtay, Dhakhtarro iyo kalkalliyaal Faransis ah , oo ka shaqeynayey xeryihii ka oodna Woqooyiga Jamhuurriyadda Soomaaliya oo ay ku noolaayeen Qaxooti Xabashada ka soo dalaabay.Soo celintii dadkaas waxaa ku kala danaystay Dawlada Faransiska iyo tan Xabashada, ayada oo aan laga talo gelin SNM oo ayadu dadkaas soo af-duubtay.

Wixii aan lahayn dhugmo dhacdo ka hor, baa wax'ay leeyihiin dhafoora qabad dambe'. Marka maskab jabkaas iyo wixii la mid ahi wax'ay u kaydsan yihiin la 'addegsey oo dhan. Isla markaas Kooxahaasi wax'ay hiilka shisheeyuhu ka helo ka sokow, wax'ay taageeraan oo kale, Taliska Maxamed Siyaad Barre, oo dadab uga guuleysta, gefkooda ay ku kala jebsheen, talada iyo tabarta dad weeynaha, iyo shisheeyaha ay kala qayb galeen burburka dalka.

Waxaa kale oo is weyddiin leh' waa sideeba Kooxahaas hubeeysan, soomaalida inteeda kale ugu jeeddaa? Sida loo badan yahay, waxaa loogu jeeddaa in ay yihiin: dooxatooyin insaarax wareersan, oo ay ka maqanyihiin dhamaanshaha garaadku, sida u uga maqanyahay Sareeye' Guuto, Maxamed Siyaad Barre, oo ka doonay in ummaddu madaxa ku socotto, markii u laba 'allifle' ka 'awood roomaaday, Sareeye' Guuto, ama Wasiirku ka gabaday gefka iyo gar darrada maareeyihiisa, Taliyaha Guud xigtada u ah.

Hadal kooban, halganka kooxahaasi waa mid aan marna dhiimi doonin wax ummaddi kaga soo kabato dhibaatooyinka dhanwalba ka soo gaarey iyo kala jabka ku dhacay midna.

Marka loo sii dhaba_galo, werafka kooxahaasi, wuxuu taageeray sii jiitanka jiridda Taliska Maxamed Siyaad Barre. Marka sow u ma fura' qofka bulshada ka tirsan, in u is weyddiiyo : Maxay doonayeen in ay gaaraan kooxahaasi? oo uu qorshaysnaa? Siddeese' bulsha weeynta Soomaaliyeed, u qadderriyeen, marka ay talo la'aan dilka iyo burburka ku bilaabeen? Maxayse' taladooda xabadda ugu hor mariyeen, ma wax'ay lahaayeen dan aan dadka intiisa kale la wadaagin, mase' dhibaato aan dadku la qabin baa ayaga gaar u haysey? Teeda kale, haddii taladu dhigdhiko gashay, oo ay ku guuleysan waayeen taladii ay ku talaabsadeen, max'ay ugu sii dhega 'adkaadeen in ay weli ku sii joogaan tubta aaya la'aaneed, oo ay ugu soo laaban waayeen dad weeynaha kale, si' xal loo wada doono looga bixi karo' iftiin la'da lagu oodmay? Mase' ummaddaa u la 'ekaatay shisheeye' aysan aayahooda ku halayn karin? Marka haddii Soomaalidu kala dhaqaaqdo',maxaa ayaga iyo goboladda ay salfadeen jil ka heli doonaan kala jabkaas? Tan kale, ma waysan muuqan in ay ka qayb qaateen qorshihii shisheeyuhu ka lahaa, kala jebinta Qaranka Soomaaliyeed, si' goboladda weli shisheeyaha ku maqani ay ugu abajiyaan? Haddii aysan ka xannuunsan, dhibaatada soomaali ku saabsan iyo dhimashada ay kaabiga u joogto', waa tan nafta iyo siyaasaddaba dhimashadu, y'aay ka xannuunsanayaan oo ay u halgamayaan, wax is weyddiinni ma ba'ne'? Ugu dambays, haddii xaal saas yahay, ma w'aan bulshadu, markeeda u la dhaqmi karin kooxahaas iyo wixii la talo ah, sida shisheeyaha, taase' ma ku gefsanaan doonta bulshada inteeda kale?

4.- Kooxahaas iyo gurdan raaca la birmaday, waxaa isaga darsamay, Qaranka aan laga lahayn iyo Hoggaanka Taliska Dawladeed oo maanta Maxamed Siyaad garkiisa hayo, berina mid kale hayn doono ee aan cidi dhaxal u lahayn.

Qaran gartiisu waa joogto, jirridda Talis Siyaasaddeedna waa wax muddo ku kooban, taasina wax'ay ku xirantahay, hadba sidii ay u urursanyihiin: talada iyo tabarta bulshada Talisku maamulkeeda hayo. Kala firirka 'awoodda bulshadu ,Taliska wuxuu ka bi'iyaa cabsida u ka qabo caradda bulshada, oo waxaa u bannaanata tubta kali taliska , fara marooqsiga iyo kibirka dhab darradda. Marka, kooxahaas kala jabka ku tallaabsaday wax'ay Taliska Maxamed Siyaad ku taageereen dhiiranaanta gurracanta kor ku sheegan.Haddi weliba la sii tix geliyo in ay u dheertahay taas, in ay shisheeye' la garabsadeen siibidda tiirarka Qaran ku dhisanyahay.

5.- Waxaa maankooda ka hoostay oo kale waa in boqol sano iyo dheeraad, ummadda Soomaaliyeed,ku soo jirtey halgan iyo dagaaloh ay u soo quurtay naf iyo duunyaba, si ay ku gaadho qaraniimo aayihiisa isagu owle' ka ah iyo si ay u soo ce'sheto garta, dad iyo dalba le'h, oo derriskeedda kaga maqan. Kooxaha garabka u noqday nacabkaas weli hor jooga sidii ummadda soomaaliyeed u dheelli tiri lahayd dhantaasha dhimirkeeda ku taal iyo meel isugu keenka waax yeheeda qarannimo, ma w'aysan u muuqan in hiilkoodu u qayb weeyn ka qaatay sii fogeynta iyo sii laalida gartaas weli ummadda ka maqan; haddii ay san dhawaan duudsi noqon ba?

Teeda kale, yaa u maqan tabar la'da lagu soo sal kiciyey beerlaxawsiga tolimo oo maanta,hooga iyo haantaawilifka ku jira? Yaase' dib u dhisi' doona goboladda burburay? Marka ma w'aan kuwaasi naga mudnayn ku tallanka iyo murugta koobaad?

Ragg waxaa u talo xun waa kan wax dad weeyne' dhex yaal kaligi gar ka naqsada' oo xargaha u gooya' Xeerarka soo jirey tan iyo bulshada filkeeda. Xeerarkaas oo ku abtirsada soo jirtada ummaddaas nolosheeda u soo dhigatay xeerarkaas, si ay had iyo goor xal ugu helaan sirgaxanta dhexdeeda ka curata amase' ay dhacdo' ku timaado. XEERARKAASI wax'ay bulshada dhexdeeda ka fongareen dhaqanka qaarkiis oo falaadka qaarkiis ka xaaraanshey. Marka haddii kooxi ama qof bulshada ka tirsani u ku sameeyo wixii la fongaray wax la mid ah, bulshadu wax'ay ka qaadi jirtey talaabo lagu cinqaabo wixii gefkaas ku eeddeysan oo aan garawsho la'hayn.

Fongoranta waxaa ka mid ah: a) qof weeyn oo siqiir kufsadda; b) qof waayeel ah oo silic gardarro' lagu dilo'; c) naasaha durmarka iyo qooraha ragga oo madali lagu gooyo'. Marka, maanta oo aaddamuhu tartan ugu jiro' samada deggideeda baa waxaa ka dhacay dalkeena iyo dadkeenna dhexdooda, shama reerkaas wadna fuqa le'h. Marka waxaa doodi ka joogtaa wixii ka gar niqi la'haa kugu timiddaas. Wax'aadse' mooddaa in dooddiba laalantay,inta loo kala baxayo , dad iyo duggaag midka aannu nahay.

Sida ay u 'egtahay, waxaa lagu noqday sabankii dadku dabka birsaday markii u horeysey.

Haddii arrinta dhan kale loo rogo, waxaa bilan: "TAGTO DAAYOO TIMAADDO HAY".

Waxaa la mooddaa in aan laga fursanayn in la isla doono wixii talo hurgun la' haya', markii laga soo il buuxsadey, marorooyinka iyo hafiska ay leeyihiin 'agablooyinka sugeya ummadda Soomaaliyeed aayeheeda dambe iyo sida aan cid kale ugu maqnayn. Tan iyo marakan waxaa lagu hawshooday iima sheega iyo timaanta wixii saldhiga u ahaa, marin habowga Maamulka Qaranka. Waxaana laga gaabshey, soo ban dhiga talooyinka ifka u noqon kara' xal doonka, la hubo in ay yihiin laga ma maarmaan, haddii la doonayo in laga lib keeno gurracanta ku timid dadka iyo dalkaba. Waxaa farta lagu fiiqay, wixii 'eeddu saaran tahay iyo wejiyada ay kala leeyihiin. Waxaa la tusmeeyey oo kale, sida bulshada lafteedu u dellagantahay iyo mintid la'aanteedda, o'ggoleysiisey keena qabadka.

Marka, is weyddiintu waa: maxaa lagu taliyaa oo xal noqon kara timaaddada? In kasta oo aysan sahal ahayn si xal lagu helaa, haddana aamusku waa ka sii liitaa, is xil gaan la'aanta saas darteed baa waxaa bilan: in si lagu demiyo dabka ay ka shideen, bulshada dhexdeeda, siyaasadda jaha wareertay iyo dhabar jebinta dagaalada sokeeye';

- Si ay ummaddu uga soo noqoto haadaamaha ay ku shalwatay iyo jimic la'da xeryaha shisheeye' oo ay dul saarka ku tahay;
- Si ay ummadda ugu soo noqoto yiddidiillo ay sareedo ku shinsato, ka gudbisa jiirsaha ha'nkeedda hakiyey, oo ay tallaabada u hinjiso xagga tubta tacabka iyo wax soo saarka aan isku fillaanni ka horayn. Si ay uga hor jeesato, ilwaad xumada jiifka, si xun sed ku doonka iyo baryadda aaddamaha, dhantaasha ku ah dhimirka qofka iyo qabkiisa dadnimo;
- Si loogu soo celiyo ummadda ku kalsamidda mudnaanteedda qarannimo, dhallintuna u shinsato sareeddo ay timaaddada kaga dhur-sugto.
- Si dad weeynuhu ugu mintido xassilinta siyaasadda, wax wadaaga iyo sinnaanta garsoorka, gunta u ah dhiillada qarannimo dareenkeeda;
- Si dalka looga xidid siibo eexda iyo fool xumada garsoor la'aanta iyo eedda fuddaydka loo galo.

Waxaa la yiri, de'li buu ka tuuraa qofkii aan u fiirsan dood socotta dulucda bio dhaceeda, in kasta oo taasi jirtana wax'aan ka fursan waayey, in aan 'arar dabadeed bulshada soo dhex dhigo, tusmooyin kaan hoos ku taxan:

Waa in degdeg loo qaadaa tallaabooyinkaan;

1.- Waa in Destuurka ama Xeerka Guud dib loo habeeyaa, markii hawshiisa laga gudbona, waa in markaas ummadda loo soo bandhigaa oo ayadu "Afti ku 'ansixisaa ku dhaqankiisa";

2.- Waa in Dad weeynaha loogu yeeraa' soo doorasho dadka ka mid noqon doona, Xibnaha Golaha Ummadda, inta tirsigooda marka hore' la sheego, la na sheegaa xilliga ay doorashadu noqonayso.Taas ka hor waa in la magacaabaa Garyaqaano soo habeeya', xeerarka maqooradka iyo hababka doorashadu ku na dhacayso ku na ansaxayso.Waa in xeerarkaas lagu caddeeyaa waxa laga doonayo qofka ama qofta u soo bixi doona tartanka doorashada. Waa in xeerarka lagu sugaa, sida doorashadaasi ku 'ansixi doonto iyo sida ay ku bashiishan doonto labadaba;

3.- Si Golaha Ummaddu u noqdo mid QARAN, waa in Xibnaha ka mid noqon doonaa, laga soo doortaa: "Goboladda iyo Degmooyinka dalku ka kooban yahay. Waa in qofka ama qofta la soo doortay u yahay, mid haysta kalsoonida dadka ku nool, Gobolka ama Degmadda u ka soo galay;

4.- Waa in la xaraameeyo ama la laabo, doorashada qofka ama qofta, la hubsaday in lagu soo doortay, eex ama hiil Dawladeed ama midda Madaxda Gobolka ama Degmadda qofkaasi ka soo tartamay;

5.- Waa in Xeerarka doorashada iyo Destuurka ba lagu caddeeyaa in qofka ama qofta loo soo doorannayo Golaha Ummadda ama meeshii kale oo taas u dhiganta aan lagu xiriin in uu ka tirsanaaddo "Xisbi" keliya.

6. - Waa ib Xeerarka lagu tilmaamo iimaha qofka ama qofta ka hor joogsan kara, ka mid noqoshada Golaha Ummadda ama meeshii kale oo u dhiganta. Iimahaas waa in ay mid noqdaan: xatooyada xoolaha dad weeynaha; dhagarta Qaranka; u 'addegga Nacabka dalka; eexda qaraaba kiilka, caad yaalka ah; gacan ku dhiig laha; ka qayb galka dagaal sokeeye', isku dayidda kala gooynta dalka qaranka; qabiil bura siinta iyo dhantaasha maanka iyo wixii iin ah oo kuwaas u dhigma;

7. - Destuurka Guud iyo Xeerarka Doorashada waa in lagu xalaaleeyo', in ay dalka ka tartami karaan Xisbio kala gaddisan, kan markaas dalka ka jiraana u san buro kuwa kale ka lahayn. Xisbiyadda dalka ka jiri doona waa in lagu sheego Destuurka GuudTeeda kale, waa in ay dalka ka soo bixi karaan, wargeysyo madax bannaanni oo aan ku tiirsanayn, Dawladda iyo Xisbiga Taliska dalka ku gacan sareeya, midna. Waa in marka hore xeerar sohdin u yeelaan, waxa ka reeban in ay qoraan wargeysyadaasi;

8. - Waa in Destuurka lagu caddeyo habka dhaqan Dhaqaale, in u yahay mid aan ku jirin "wegaarka maamulka Dawladdeed iyo koox yar midna ee u yahay mid u furan Bulshada Qaranka iyo hodamadda shisheeyaba. Waa in Cid kastaa ay dalka maal gelin karto, waa na in ay jiraan xeerar u samaysan hababka maal gelinta iyo ganacsigaba. Waa in ay jiraan xeerar sidoo kale, kor jooga tartanka maal gelinta iyo ribixaba shisheeyaha Siddoo kale, waa in xeerar kala haggaajin xoogsatadda, bulsha weeynta iyo ganacsatada ;

9. - Mark'ay 'ansaxdo doorashada Xibnaha Golaha Ummaddu, waa in Madax weeynaha Jamhurriyaddu u Golaha ka magacaabo ninkii noqon la'haa Guddoonshaha Dawladda.

Nin kaasi waa in uu markiisa, kala soo baxaa Golaha Ummadda, raggii Dawladda ka noqon lahaa Wasiirrada, marka uu kala soo arrinsado Madax weeynaha, tirsiga xibnaha Dawladda, dabadeed;

10.- Guddoonshaha la magacaabay waa in uu Golaha Ummadda hor keenaa "Qorsha Hawleedka Dawladdiisu ku shaqayn doonto iyo waxa ay qaban doonto. Qorshahaas oo u kala baxsan:"Hawl DIBEDDEED iyo HAWSHA GUDAHA". Waa in uu Qorshaha ku caddeeyo, sida ay hawlhaasi u kala culusyihiin, siiba kuwa Guduhu iyo sida loo kala hor marin doono hawl galkooda. Dood iyo kala gur dabadeed, waa in uu Golaha weyddiisto kalsooni, haddii u taas wayana, waa in Madax weeynuhu, u nin kale soo qabtaa.Nin kaas oo isna mari doona marrinkii kii hore' maray, tan iyo inta Dawladdu kalsooni ka hesho.

Marka haddii wax laga oddoroso hawlaha mudnaanta koobaad yeelan doona, waxaa ka mid noqon doona, sida ay i la tahay kuwa hoos ku taxan:

a) - Degdeg waa in loo qadaa talaabooyin lagu doonayo soo xassilinta Nabad Sokeeye' oo lagu beerro ummadda Soomaaliyeed dhexdeeda;

b) - In degdeg loo soo furo' dadkii u xiran siyaasad, ama ha xukunaadeen ama yaa aysan xukunaan eh;

c) - Cafi guud waa in loo fiddiyo bulshada kale oo taliskii hore' ka hor jeedey, taas darteedna ku tolowdey; gudaha iyo dibeddaba meel kasta ha joogtee';

d) - Waa in Dalalka deriska ah oo shidadu na dhex taal, loogu yabooho, nabad iyo kala gar bax run ku dhisan, si colaadda iyo xassil darradda , Gobolka Geeska Afrika naafaysay looga soo kabto. XASSILOONAAN, NABAD iyo kala GAR QAADAD, ku yimid, kalsooni iyo is tix gelin loo simmanyahay.

Tallaabooyin kaas nabad doonku waa in aysan noqon kuwa duudsi u soo jiidda garta ummadda Soomaaliyeed oo weli laalan ee waa in ay noqoto kuwo jid u bixiya kala baxa garta ku salaysan;

e) - Waa in Qorshaha Dawladdu u diirka ka qaado Siyaasadda ay kula dhaqmi doonto Dawladaha adduunka intiisa kale, weliba labada Xoog oo u talinta koonka looltanka ugujira ( Ameerika iyo Russia);

f) - Waa in Dawladdu degdeg ugu tallaabsataa si walbana ugu hawl gashaa, wax kasta oo demin kara' dagaalka sokeeye' oo weli dalka dhexdiisa ka shidan. Sida la wada 'ogyahay, meel nabadi ka jirto, baa Qorsho iyo Hawli ka hir galaan ee meel aan nabadi ool ku ma kaydsamaan: Dhaqaale iyo 'Aqoon midna;

g) - Waa in Goboladda dagaalada ku burburay, halhaleel dib loogu dhisaa, si umaaddii ka sal kacday, dib loogu soo celliyo. Maal gelinta dib u dhiska Goboladda, waa in Qaranku adduunka amaah ka doontaa, marka u soo helana, waa in loo magacaabaa , qorshaha iyo hawl qabadka dib u dhiska, koox ka kooban aqoon yahanno, ay na taageeraan aqoon yahanno ka socda dalalka ama ururada amaahda laga soo qaatay, si ay had iyo goor dhabiil ugu hayaan, dadka hawlaha laga xil saaray iyo Dawladaba;

12.- waa in Destuurka Guud lagu caddeeyaa xilka Madax-weeynaha ka saaran dadka iyo dalkba. Sidaas oo kale, waa in Destuurka lagu sheegaa, habka lagu soo dooranayo Madax-weeynaha. Waxaa ayana laga ma maarmaan ah in xeerarka lagu sheego, sohdimaha hawlaha iyo xilka Madax-weeyuhu ku simanyihiin, siiba maamulka Dawladda.

- Waa in ayana la caddeeyo, "dembiyada Xilka looga qaadi karo ", marka ay ku sugnaadan
- Waa in Destuurka Guud lagu sugo' in ay shara'd tahay in loo soo tartamay madax-weeynenimada soo doorashaddiisa; waana in Xeerka lagu sheego', burada Madax-weeynuhu leeyahay inta Xilku saaran yahay iyo marka u ka degeba.
- Marka intaas la hir geliyo , waa in loo hawl galaa dhismaha iyo shaqa gelinta Xibnaha Qaranka u 'addegi doona oo xeerar lagu kala sheegay, hawlaha ay kala leeyihiin iyo sohdimaha u dhexeeya iyo kuwa xirririn doona wada shaqayntooda.

Habkaasi waa kan Qaran ku kasbo kalsoonida dadkiisa iyo tix-helinta qaramada kale oo adduunka ku dhaqan; waa na habka ugu dhow dhaqanka "Diimuqaraddiyada", oo ummaddii ku gaarto: sinnaan, qadderin, awood dhaqaale iyo tu aqoomeedba oo bulsha weeynta ku fida'. Hagaaska iyo dib u dhaca ummaddenu maanta la dambayso baa waxaa sal u ah, intaas oo dhexdeeda ka maqan.

- Teeda kale, waa muran ma doonto in dhib ka imman doono, dib u habaynta iyo xeeraraynta hawlaha Qaranka, kuwaas oo ummadda maanta ka firirsan.
- Waxxa had iyo goor madax ku hayn le'h, waa in dadka iyo dalkuba soo haraan, asii ay gudbaan : "Talisyada Siyaasaddeed oo Nafleeydu maamushaa". Runtaas baa wax'ay nagu waaninevsaa in aan laga quusan aayaha dadka iyo kuwa dalkaba.

Itaas waxaa daba-yaal, dignin tusaala ka ifinaysa, tirsiga Nacabyada ummadda Soomaaliyeed, sida hoos ku qoran:

1.- Nacabka koobaad waa Taliska Maxamed Siyaad Barre u Hogaankiisa hayo, oo siddii kor loogu sheegay, makaab ku noqday,tubta sareeddada hor'uu kaca loo maro'. Sii joogidda Taliskaasi,wax'ay "hallis rubadeed ku tahay, sii jiritaanka Qarannimada Ummadda Soomaaliyeed, weliba marka, gaar loo tix-geliyo,wixii Muqdisho' ka dhacay, bishii Luuliyo 1989kii; markii, maatto aan hubaysnayn,lagu warjeefay, darriiqyada iyo xeebaha badda cawgooda. Dembigaas oo ay ku tallaabsadeen,haadaduunta Madax-weeynaha ilaalisa oo u xigta 'ahaanta isugu meegaaray. Dheg-xuntaasi,waa ged cusun oo la soo baxay, Guddoonshaha Qaranku, waase' ged ay ka ifayso, 'astaanta tala seegu. Teeda kale, weli cid loo ma soo qoolin, wixii dembigaas eeddiisu saaran tahay, oo waxaa muuqata in Taliska arrintaasu saaray dabool duudsi. Waxxase' la wada 'ogyahay, in ay yihiin dooxatooyinka hoostiisa ku gaamurey dhaca dadka iyo caburintiisa. Inkasta oo aan la magacabin, waxaa laga war hayaa in ay cuntubyada hogaaminayeen Abaanduulliye yaal, ka mid ah xigtada Qoyska Madaxweeynaha.

Geddaasi waa mid u canceeno u biday sii jiriddisa Taliska daaley. Saas baa na caaddo u ah Kali Taliska oo dhan marka ay soo gaaraan daba yaaqada Taliskooda la eeday. Waa sansaanka naf la caariga lagu yaqaan, marka ay ummaddu soo tufto', falaad xumada maamulkiisa.
Taliska marroqsiga ku yimid, laga ma helo', in u is daba qabto inta uu weli leeyahay wax la toosinta ee wuxuu sii ruubtaa moolka aragti xumada , 'awoodna waxaa kaga soo hara' mida u gefka uu gefka ku xalliyo.

Sida soo martadu na soo bartay, Kali Talisku, wuxuu ku raaggaa, meesha ay qaybsan yihiin, TALADA IYO TABARTA BULSHADU. Taas baa na waxaa ka beerma', dooxatooyin hubaysan oo qaskooda ku sii kala firdhiya 'awoodda ummadda, awelba quusta joogtey.
Dallaashaas baa Talisku wuxuu ka helaa xeelaha sii kala firdhinta bulshada, si aan ciddiba uga hor imman, wax u 'addegana dadka ka ma waayo.

2.- Waa Kooxaha dalka ka bilaabay dagaaladda sokeeye', oo Taliska Maxamed Siyaad la wadaaga macangagnimada iyo taladdiidka ba. Kuwaas oo wixii gefkooda wax ka sheega ama ku gudba, talo tooda ka ilwaad roon, u yeela iimoh aysan la'hayn, amase' waaba colaadiyaan. Dulnugeyl kaas wax'ay ku da'haan gefkooda dhigaal xumaddisa Falaadkaas oo ka fog dhaqanka dan iyo talo wadaaga, bulsho dhexdeeda isku tix geliso.3.- Nacabka ugu tann weeyni waa Reer Galbeedka, oo Dawladahoodu aysan weligood ka deeyn ummadda Soomaaliyeed, hagaasin iyo lug qabasho. Kuwaas oo qaarkood ay sabaanaddii gumeysiga kala waaxyeysteen dadka iyo dalka soomaaliyeed. wixii ka soo harayna ku taageeraan in Xabashadu qabsato. Haatan oo la joogana ku taageera in ay dadkaas iyo dalkaasiba duudsi noqdaan.

Colaaddoodu wax'ay ku salaysan tahay, colaad diimeed oo ay Diinta Islaamka u qabaan, taas oo dhaxal siisay in ay had iyo goor, hagaasiyaan danta ummadda Soomaaliyeed, mar kasta oo ayada iyo deriskeed is qabtaanna, wax'ay la saftaan, Keenya iyo Xabashada, oo la wada 'ogyahay in dad iyo dal soomaaliyeed labadaba ku maqanyihiin. Teeda kale, wax'ay mar walba ku shaqeeyaan in Soomaaliya ay ahaato, sabool, si loogu haadsado tabar yarridaas, inta'weliba loo beerro dhexdeed dhibaatooyin aysan ka soo waaqsan.

Wax'ay Soomaaliya ku colaaddiyaan in ay ka tirsan tahay adduunka Carbeed, Carabta oo ay colaad raagtey caloosha ugu hayaan; colaaddaas oo ku sinnayd, tan iyo sabankii Islaamku gaalada la dagaalamay, Yurub dalal ka mid ahna u qabsaday iyo haatan oo la joogo oo Galbeed oo dhammi la jiro, Yuhuudda oo Carabta dagaal dhex yaal.

Saas b'aan loo filayn, timaaddada in Reer Galbeedku, hagar la'aan wax ugu taraan Qaranka iyo ummadda Soomaliyeed. Wixii ay taraanba waa dufantirio iyo dhalaan habaabis.

4. Nacabka afraad waa Carab oo aan hiil iyo hoo midna lahayn, waa na ka simanyihiin Carabta oo dhammi. Isku hallayn ma le'h,si' loo eegaba. Dalalka Carbeed waxaa u kala talliya: "Reer Galbeedka oo Ameerika hor yaal u tahay iyo Reer Bariga oo Rushku gar haye' u yahay", ee talo iyo tawfiiq ay leeyihiin aayahooda ku ma daryeelaan; tu dad kale na, haba sheegin. Runtaas soomaali badan b'aan la dhacsiin karin. Badi soomaalida waxaa isaga darsan, Diinta Islaamka iyo Carabta, oo ay la tahay, in Diinta wax loo dhimay haddii Carabta iimaheeda wax laga sheego, sidii ay Carabtu ka duwantahay dadka kale oo adduunka ku nool. Carabtu waa ugu tirsi yar tahay ummaddaha Diinta Islaamka taabacsan, saas darteedna Carabtu Diinta gaar bud dhige' ugu ma aha.

Reer Galbeedka iyo Reer Bariguba, wixii ay doonaan b'ay ka helaan Carabta iyo Carab u yaalkaba, ayaga oo had iyo goor u soo mara' kuwa Carabta ugu tann weeyn, dad iyo duunyaba.

Carab u yaalka waxaa ka mid ah: " Soomaaliya; Mawrritaanya iyo Suudaan" oo u keenaysan Golaha Ururka Carbeed, oo ay si walba callaal ugu yihiin.

Dawladdaha Carbeed weliba kuwa dhawaan hodmay, wax'ay Carab u yaalka u la dhaqmaan, sida sokeeye' cayreed, oo ay u qaban in ay ku nool yihiin, sandareertada quureed oo ay u tuuraan. Markaasna wax'ay ka donaan in ay ka helaan danta ay ka leeyihiin.

Sida la soo 'arkay, wax badan, baa waxaa lagu sigtay in lagu kala dhaqaaqo Ururka ay ku wada jiraan iyo xirriirka isu hayaba. Kul dilaacaas waxaa keenayey waa: "falaadka basari kibirka ay leeyihiin, dhawaan hodanka carbeed iyo quur diidka Carab u yaalka".

Haddii annu dib ugu soo noqono, xirriirka Carab iyo Soomaali soo dhex maray, waxaa la heli doona, in Soomaaliya ahaan jirtey moesha cayraha carbeed ku soo hirtaan marka naftu waddey.Waxaa kale oo Soomaaliya ahaan hirtey dalka ay ka soo doonan jireen, wixii noloshooda salka u ahaa, sida: cuntadda, shidaalka, sida dhuxusha, xayrta, subaga, xoolaha nool, qoryaha dhismaha 'aqalladda iyo doonyaha ay adduunka ku mari jireen, iyo qalab badan oo kala gaddisnaa, sida: haragga, xoola dabadeedka iyo kuwa la dhaqdaba, ayada oo aan la illoobin, baalka goroyadda, xabagta cayn walba lahayd. La ma tirin karo' wixii carabi soomaaliya ku haysan jirtey o oo dan ahayd. Xirriirkaasi wuxuu soo taxnaa boqol guurooyin badan. Dalalka Soomaaliya noloshoodda qaybta ku lahayd waa kuwa dhawaan hodanka noqday oo xasuustii soo martadda ay maankooda ka baxday.

In kasta oo ay saas tahaynna, haddii dib loo raaco soo martadda Soomaalida, la ma heli doono, meel dalalka Carbeed , isku dar, ay ku taageereen Ummadda Soomaaliyeed oo xigto ahaan hiil uga bahatay. Wax tar meeshiye', waxaa marar badan la soo arkay, in mar kasta oo Soomaalida iyo shisheeye' dagaalo dhex marrenba in Carabta qaarkeed toos u la soo safan jirey nacabka ummadda Soomaaliyed, ay na soo gaarsiin jireen dibindaabyo aan yarayn. Dhacdooyin kaas,waxaa u dambeeyey, dagaalkii Xabashada iyo Soomaalida dhex maray 1977-78dii, mar kaas oo ay dhanka Xabashda ka soo safteen: Rushka oo abbaan duule' ka ahaa ciiddamaddii: Kubba, Jermalka Bari iyo dalalka kale oo Rushka ku tiirsan. Dalalkii Carbeed oo toos, Xabashada u la soo saftay,waxaa ka mid ahaa: Yemmenta Koofure, Liibya iyo Ciraaq oo ahayd,meesha la soo mariyo, ciiddamada iyo hubka Xabashada loo wado, loo soo marin jirey. Ka dibna magaalada Basra ay noqotay, xarunta ay ku soo nastaan ku na sii nastaan, duuliye-yaalka dayuuradaha dagaalka ee Rushku. Is la markaas dhanka kale, waxaa saf dhagareed kula jirey dalalka Reer Galbeed, Carabta intii aan dagaalka tooska u soo gelin. Dalalkaas waxaa ka mid ahaa: Sacuudiga, Masar, Kuweyt iyo Immiraadka Qalijka. Dal ka haray ka hiillinta Soomaaliyeed waxaa ka jirey, Yemmenta Woqooyi iyo Mawrritaanya. Inta kale Soomaalida waa ka wada hiilliyeen, in kasta oo qolaba xeel gaar u ah ku dhaqantay.Arrintaasi wax'ay u baahan tahay: à) in 'aad loo sii derso, si' qoraalo looga reebo; b) in aysan ka bixin xasuusta ummadda Soomaaliyeed oo godobta laga galay.

Dalalka Carbeed dhagarta ay ka qayb qaateen wax'ay ahayd middii dalalka Reer Galbeed ku fayla goynayeen Qaranka Soomaaliyeed oo ka koobnayd," ballan qaadka"hiilka beenta iyo sirta ku dhisnaa, oo Reer Galbeeda iyo Carabtuba Soomaalida ku guubaabshey,dagaalka sii wadidddiisa, markii Soomaalidu dagaalkii ku fogaateyna ballankii ay uga baxeen. Hosaasintaas dhagareed danta laga lahaa, wax'ay ahayd: in marka hore', Soomaalidu ku luufluufto dagaalka, markii ay soo tabar yaraysana in ay ku dirqiyaan: "Xirriirka oo ay u laabaan dalalka Reer Bariga oo Rushku u horeeyo, tan labaadna in ay ciiddamaddeeda dib u la soo noqoto. Labadaas arrimoodna, dalalkaasi si fudud b'ay Soomaalida uga heleen, markii dambana, waxaa lagu soo rogey in aan Soomaalida hub laga iibin, si ay uga quusato sii haynta dalka ay ka xoraysay gumeysiga Xabashada, taasna sahal b'ay Soomaalida u gaarsiiyeen. "Falaa waa ilooba, lagu falaase' ma iloobo' b'ay tirahdaa soomaalidu".

Taladaas Rushka iyo Mareykanku hishiis b'ay ku ahaayeen. Arrintaas waxaa ka yaal qoraaladii dhex maray labadaas dal.

Dalalka Reer Galbeed wax'ay ka heleen kuwa Carbeed in ay Soomaalida ka joojiyaan taageero' oo dhan cayn ay noqotaba. Taasna haihaleel b'ay u fuliiyeen, sida la 'ogyahay. Taageeraddii yarayd oo Soomaalida laga soo dabana, wax'ay ku taageereen Masar oo la doonayey in ay iska iibiso hubkii Rushka oo ay horay u haysatey, oo Soomaalida

lagu khaarajiyey. Habkaas sirta iyo dhagarta huwan baa Masar Soomaalida la hor timid weji labeen abaal ka mudan, oo weli ma kastu u hayso.

Hadal kooban, Carabi mar kasta wax'ay lid ku ahayd danta ummadda Soomaaliyeed. Nacabnimada Carbeed waxaa laga taaban karaa oo kale, waa in markii dagaalkii laga tuug roomaday, dalalkii ay weligeed la lahaan jirtey, xirrirka ganacsi ,ay ku soo rogeen cuna qabatayn, inta dalalkooda ka joojiyeen in xoolihii Soomaaliya uga iman jirey. Xoolahaas oo ayagu weligood qaadan jireen. Meeshoodina waxaa galay xooloh laga keenay Australiya oo la 'ogyahay inta ay u jirto dalalka Carbeed.

Teeda kale, haddii wax yar laga soo qaado, sabanaddii Soomaalidu la werfeysey dagaaladdii," Gumeystihi ka yimid dalalka Reer Yurub iyo Xabashaddii ayaga soo gabbaadsatay, badi dalalka carbeed wax'ay la safnaayeen shisheeyaha oo ay ku taageeri jireen, cuddud iyo 'aqoon ay u lahaayeen dadka iyo dalka Soomaaliyeedba, hiilkaas waxaa ka mid ahaa, soo gar qaadka iyo ka af celinta.

Dhaqdhaqaaqyaddii Siyaasaddeed oo ay Soomaalidu ku taliaabsatay wixii ka dambeeyey dagaalkii Labaad, wax is hor taaga, halgankaas siyaasaddeed,waxaa u horeeyey dadkii Carbeed,oo dalka ku noolaa,oo la moodayey in ay ummadda la mid ahaayeen, oo safka la soo galay, shisheeyihiii ummadda caddaadsika ku hayey, weliba koofurta dalka.

Markii ay badatay wax yeelmaddii dadka carbeed Soomaalida gaarsinayey, waxaa Soomaalidu ka fursan weydey in ay dadkaas gacan u la tagto. Waa markii/u baxay baaqii, caanka ku noqday:" Soomaaliya ha noolaato", wax'ayna ahayd 1948.

Mar kasta iyo meel la joogaba, Soomaalidaa u horaysa , mintidka iyo shirar ka sheega, garta iyo dalka ka maqan ummadda Carbeed, taas oo ay Soomaalida ku soo gaadho eed badani, sida kuwa dalalka Reer Galbeed iyo waxa ay dabada ku wataan, iyo Yuhuuddaoosi gaar ah u colaadisa Soomaalida . Afrikada kalena wax'ay Soomaalida ku eeddaysaa,in Carabayla safatay oo wax badan ay danaha ummadda Afrika kala jeedaan.

Marka waxaa la moodaa in la soo gaarey goortii, Soomaali iyo Carabiay dhabiiltami lahaaveen, inta is haybiyaan waxa danay ku wadaagi karan? Maxaa yeelay, mar hasta Soomaalidu ma xambaarsanaan karto culaabta carbeed, teeduna ay ayada gaar ku tahay. Haddii aan is weheshigu u san ku dhisnayn: Hiil iyo hoo midna ", ma muuqdaan wax ay isugu mattan sanaadaan, oo ay Carabtu kaga mudan tahay dadka kale oo adduunka ku dhaqan, Soomaaliduna wax la wadaagi karto . "Gacamoh is dhaafaa gacalo ku jirtaa", baa murti Soomaaliyeed tiri, taas baa na runta u dhaw.

Teeda kale waa laga ma maarmaan in qaramada adduunku ay wax is weydaarsi leeyihiin, waxaase' ayana laga ma maarmaan ah, waa in u san

xirrirka aaddamaha dhex marayaa u san ahaan mid ku salaysan in qolo, dan la'aan, ay siddig ku tahay qolo kale, dhaqaale iyo aqoonba.

5.- Soomaalidu ayadaa, marka hore', nacab tanteeda ku ah. Maxaa yeelay, marna ma dhaagto waxa salka u ah dib u dhaceeda,ka reeba dhigeed. Soo ma karaan, hagaaska iyo haantooleyda ay badaan u liicsanaanta habar wacadka qabiilka iyo hoosaasinta hawlaha Qaranku. Iimahaasi waa kuwa u laylya quurta qadashadeeda, taas oo dhaxal siisa, in ay ka daqnan weeydo, qaarkeed oo shisheeye' gumaadayo. Waana marka ay aawilli weeydo, dulliga ka soo aaddan duudsiga dalkeed iyo dadkeeda weli shisheeyuhu u gumeysto. Intaas oo dhan waxaa ka xun, waa marka xil kaskeedu u ka dhuunto tilmaamidda arrimaha ummadda ka firirsan iyo waxa sababta u ah, ee u eedda ku waabo: "tolka !" u ka dhashay Madax-weeynaha Qaranku. Dhibka ummadda uga yimaada Taliska Hogaanka Maamulka Qaranka haya, loo ma aanayn karo, Reerka u ka dhashay, Guddonshaha Talisku, eeddu wax'ay saaran tahay, guudka Xibnaha Siyaasaddeed oo xilka Maamulka Qarank. Qabiil u ma qoolmo dembiga ka yimaada maamul xumada, saa cidi xil ka ma saarin arrimahaas eh. Marka haddii ay ku fillaato wax garadka, eeddaynta reerka Madax-weeynuhu ka dhashay, waxaa muuqanaysa in kooxdaasi ay marin habowsan tahay. Maxaa yeelay, waxaa marka hore' la gudboon in ay is haybiso, meesha ay ku aasanyihiin xeelaha, Kali Talisku ku taagan yahay, oo aan ahayn: qabiil beer-laxawsigi oo keli ah. Waxaa ku filan in ay u kuur galan, in Qaran reer ku taagnaan karo iyo in kale. Waxaa ummaddasi ka ilduufsan tahay, waa in marka hore, Kali Talisku, huwan yahay "Haybadda Qaranka" iyo awooddiisa, ee u san danihiisa u san ku halayn karin isku tiirinta qabiilka Madax-weeynaha. Qabiilkiisa wuxuu ugu danaysta guullida dad-weeynaha kale, oo u ayagaba ku wada shaqaysto hadba sida dantiisu ku waaniso. Hadana la ma hubo in tol dhammi wada ogol yahay ku hollinta dufan tiryada. Waxaa la is moogeysiiyaa in Talisku u bulshada ka samaysto hulal badan, oo reer walba leh, wax dan ku haysta iyo wax la hodeyba.Badise' waxaa isha iyo afkuba qabtaan, cuntubyada Madax-weeynaha ilaalisaa reerka ay ka tirsan yihiin. Waxaa kuwaas soo raacah, waa kuwa aan had iyo goor aan 'agtiisa laga waayin. Kuwaasi wax'ay u badan yihiin, kuwa dadka ku 'ugaarta magaca Madax-weeynaha, xigto ahaan, wax'ay na u badanyihiin af-miishaqarada aan ceebta iyo dhirricidu cuslayn. Marka qabiil dadkiisa kale dhibka la qabad, eedda lagu dhoobo, waxaa halkaas ka iftay aragti yari iyo xil ka dhuumasho, marmarsiinyo loo doonayo.

Tan kale, Qaran waxaa tiirarka u ka taggan yahay ka mid ah, waa ciiddamadda salabka sida oo aan ayana eed ku la'hayn, gebi dhaclaynta siyaasaddeed; waxaase' dalalka saboolka ah, lagu arkay, in sarakiisha tolka la wadaagta, madaxda Taliska ugu tann roon, meelaha hallista ah in ayaga lagu halleyo.Taas oo dad-weeyuhu u arko buro sarakiishaas loogu eexday, asii aan la tix gelin, hallista ay ku sugan yihiin iyo culaabta xiira la saaray midna.

Qaran wuxuu ku jira waa dhiftinta iyo dhib u dulqaadadka ciiddamaddiisa, oo haddana ka saboolsan bulshada in teeda kale. La'aantood dalku baylah buu ahaan lahaa, saas darteedna ciiddamaddu u ma aanoobi karaan, maamul xumada Qaranka, ay dhibkiisa dadka la wadaagaan ee waa in aan lagu qassin, loolanka Siyaasaddeed oo bulshada dhex yaal, haddii kale, waxaa lagu dhici doonaa jaha wareer aan waxba kala socnayn, waa na in mar walba madaxa lagu hayaa saboolnimada ciiddamadda dalku ka simanyihiin, reer kasta ha u dhashe'ka!

Waxaa soomaali caaddo u noqotay, in uu QARANKA colaadiyo ninkii aan buro ku haysani Dawlada, dalka maamusha, mar kaasna wuxuu gaashan ka dhigtaa, qabiil u kiciyo iyo qabiil u ku kiciyo. Madaxda dalka oo badan waxaa ka tilmaaman Madax-weeynaha iyo Tolki, waa eeddayn aan marna mira dhallin, sida horay loo soo arkay. Maxaa yeelay, runtaan wada sheegnayn, markaasna eedda waa loo sinnaadaa.

Waa in ayana madaxa lagu hayaa, in Madax-weeyne' kastaa u Reer ka dhashay, ku jooga iyo kii yimaadaaba, wixii u xumeeyana soomaali oo dhan baa dhutin doonta, saas baa waxaa haboon in arrinta laga abaaro meesha ay la'dahay iyo salka sababta.

Haddii ay taasi na deeqi weeyddo ma haboontahay, in annu adduunka kale ka soo amaahanno Madax-weeyne, garta noo qaybiya? Mase' wax'aannu Xeerannaa in Madax-weeynaha laga soo doorto soomaali reerka ugu yar.

Ugu dambaysta, wax'ay anniga ila tahay, in eeddeynta qabiil Madawxeeyne', ka dhashay aysan qofna ka reebeyn xilka ka saaran arrimaha dalkiisa iyo dadkiisa toona. Tan sugan oo kale waa in aan qabiil keligii u san wada qaadi karin xil Qaran, sidd'oo kale na u san wada hanaan karin hawlihiisa. Awood iyo fara kasta oo u leeyahay , qabiil Dawlad talada kala ma wareegi karo. Inta annu maanka qabad siin la'nahayna taasna , taleedeennu wax'ay waligeed ahaan doontaa mid kala firirsan. Waxaa horay loo hubsaday, in qaran aan 'addegsan awood "Xeerar addag", ay isaga 'addeegsan doonaan : "Kali Talisyoh 'agab la'aaneed iyo dooxatooyin had iyo goor heellan u ah dhantaashiisa".

La toosaa haboonaa.

Qore',

Guuldoon Waasuge'